## KUSOO DHAWOOW

# GIRL GUIDES (HAGAHA GABDHAHA) VICTORIA

In ka badan 110 sano, Girl Guides Victoria waxay awood siinaysay hablaha iyo haweenka si ay u kobciyaan xirfadahooda, u ogaadaan awoodooda isla markaasna ay u noqdaan hoggaamiyeyaal. Iyada oo qayb ka ah Girl Guides Australia iyo dhaqdhaqaaq caalami ah, waxa aanu ku xidhanahay in ka badan 10 milyan oo hablood oo ku kala baahsan 150 wadan, anagoo kobcinayna barnaamijyadeena isla markaasna la wadaageyna khibradaha kicinaya dareenka iyo ujeedada.

### Maxay Girl Guides (Hagaha Gabdhaha) qabtaan?

Barnaamijyadeenu waxay gabdhaha awood u siiyaan sidii ay mas'uul uga noqon lahaayeen noloshooda, u dhisi lahaayeen xirfadaha dhanka hoggaaminta isla markaasna ay ugu xiriiraan lahaayeen bulshadooda. Nidaamkeena taageerada ah, gabdhaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay hadlaan, sahamiyaan danahooda, isla markaasna ay kor u qaadaan kalsoonida ay ku qabaan awoodooda. Haday noqon lahayd sahminta dibadda iyo hawlaha ay dadku xiiseeyaan ee STEM iyo sidoo kale caawinta la caawinayo dadka kale iyo in qofku uu shaqsiyadiisa wax ka barto, qof kasta wax un buu ka faaiidayaa Guides.

### Yaa maamula ama kormeera Girl Guides?

Barnaamijka Girl Guide iyo waxyaabaha ay qabtaan waxaa maamula koox tabaruceyaal ah oo loo yaqaan 'Guide Leaders (Hogaamiyayaasha Hagaha'). Guide Leaders (Hogaamiyayaasha Hagaha) waa hogaamiyayaal la aamini karo oo xirfad leh kuwaas oo wakhtigooda u huray inay wax baraan, imtixaanaan isla markaasna taageeraan gabar kasta.

### Goorma ayay Girl Guides kulmaan?

Xubnaha Girl Guide waxay kulmaan hal mar oo maalmaha shaqada ah isbuuciiba, xilliyada iskuulka marka laga soo baxo kadib iyo habeenadii inta ay iskuulaadka furan yihiin. Guides (Hagayaashu) waxay kaloo dooran karaan inay ka qayb qaataan kaamamka, meelo kale marka la aadayo, iyo wixii kaloo markaas la xiisaynayo, iyo sidoo kale barnaamijyada la qabto inta lagu jiro fasaxa iskuulaadka ee madadaalooyinka iyo xiisaha leh ee meelo kala duwan lagu qabto sanadka oo dhan.

### Maxay xidhaan Girl Guides?

Hagayaasha ayaa looga baahan yahay inay xidhaan Funaanad Polo ah oo ay Girl Guide leeyihiin iyo maro kalarkeedu buluug madoobaad ah (navy) oo ay caloosha inta ka hooseysa ka xiranayaan, oo ay la socoto garabaati muujinaya calaamadahooda aqoonsiga. Waxyaabaha kale oo ay haday doonaan qaadan karaan, sida finaanadaha koofida leh, funaanadaha kale, iyo koofiyadaha, ayaa la heli karaa. Dadka ka tirsan Girl Guides waxa kale oo ay xidhan karaan waxyaabo dhaqan ahaan aysan ka maarmin, sida dhar gacmo-dheer, surweel, iyo qamaar, oo ay la gashanayaan funaanadooda polo-da ah.

### Yaa kusoo biiri kara Girl Guides?

Gabdhaha da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 17 sano ayaa kusoo biiri karo Girl Guides isla markaasna ka qayb qaadan karo Barnaamijka Hagaha. Xarun kasta waxay deegaankeeda u sameysan kartaa da' gooni ah oo laga rabo inay dadka ka qeybgali kara noqdaan, markaa ka hubi xarunta deegaankaaga si aad u ogaato da'da ay aqbalayaan.

### Sideen Ugu Soo Biiri Karaa Girl Guides?

Gabadhaadu waxa ay marka hore iska tijaabin kartaa barnaamijkan wax haga ilaa saddex kulan ka hor inta aysan go'aansan inay ku biirto. Si aad u bilowdo tijaabada, isticmaal website ka si aad u hesho xarunta kuugu dhow ee barnaamijkan wax haga oo ka codso inaad marka hore tijaabiso. Tijaabada ka dib, buuxi foomka is-diiwaangelinta ee laga heli karo mareegaha qeybta dadka xubnaha ka ah (Member Portal) kabacdina bixi lacagta si aad u noqoto xubin ka tirsan barnaamijka Girl Guide oo qeyb ka noqo madadaalada meesha ka socota. Iskaan garee QR koodhka ama booqo www.guidesvic.org.au si aad macluumaad dheeraad ah u hesho!